

# Ma u diyaarsan tahay qalalaaso?

Xaallado hawo oo aad u daran ayaa dhici karta mar kasta sanadka Queensland gudaheeda waxayna saamayn kartaa adiga iyo qoyskaaga waxayna burburin kartaa hantidaada. Xaalladahaas waxaa ku jiri kara dabaylo, daadad, duufaan, dhulgariir ama dab-kaymeed.

Ma xakamayn karno hawada, laakiin waa diyaarin karaa.

Masiibada ka hor, hubi inaad haysato:

-  Qorshaha xaalladaha degdegta ah oo naftaada iyo qoyskaaga, taas oo uu jiro qorshaha marabida
-  liiska xiriirada xaalladaha deg degta ah
-  caymiska hadda ah
-  Kit-ka xaalladaha degdegta ah.

Macluumaad intaas badan iyo talooyinka u diyaargarawga masiibada, booqo  
[www.getready.qld.gov.au](http://www.getready.qld.gov.au)

## Xaggee laga hellaa caawimada masiibada ka dib

**Waxaa la heli karaa kaalmada niyadeed iyo mid waxqabad oo dawlada iyo hay'adaha faaiido-ma-doonk ah oo dadka masiibadu waxyeeshay.**

### Kaalmada shakhsiyeed iyo tala-siinta

Waa wax badanaa dhaca inaad la kulanto dareen xoogan ka dib masiibada. Kaalmo shakhsiyeed iyo mid ficliyan ah ayaa la heli karaa haddii ay ku haysato dhibaato shucuureed ama aad u hawlgasho inaad xamisho.

Raadi caawimo hadaad tahay, xubin qoys ama saaxiib:

- ay ku haysato cadaadis shucuureed iyo mid maskaxeed
- dareemayo daal, dhibsasho ama dareemid rabitaanka cuntada ama oo astaamaha hurdada
- dareemid isbedel dabeecadeed sida isticmaalid khamro oo siyaaday ama noocyoo kale oo darooga ah iyo ka fogaanshaha kuwa kale
- waxaan u baahnahay qof aan la hadlo.

### Kaalmayn shakhsiyeed iyo la-xiriirida talasiinta

- Lifeline Australia (talasiin) – **13 11 14**
- Laanqayrta Cas ee Australia – **1800 733 111**
- St. Vincent de Paul – **13 18 12**
- Hay'ada Caafimaadka Queensland – **13 HEALTH (13 43 25 84)**
- Caawimada gurisiinta – **13 QGOV (13 74 68)**
- Adeega Xaalladaha degdegta ah (SES) – **13 25 00**
- Khadka ka-sooraynta Bulshada – **1800 173 349**

Si aad u hesho xiriirada adeegyada kaalmada bulshada guud ee laga heli karo agtaada, booqo [www.qld.gov.au/disasterhelp](http://www.qld.gov.au/disasterhelp) iyo baarista ‘kaalmada bulshada goboleed’.

## Caawimada dhaqaale

Kaalmada dhaqaale iyo adeegyada kaalmo ayaa laga yaabaa in la hello haddii uu dhibaato kuu geystay khasaaruuhu.

Caawimada lagu bixiyey Qorshaha wadajirka-loo-maalgeliyey ee Ka-soo-kabsashada Qalalaasaha (DRFA).

### Deeqaha\*

- ✓ **Caawimada Dhibaatada Degdegta ah –**  
dadka jooga goobaha dhibtu ka jirto si looga caawimo baahiyaha degdegta ah sida cuntada, dharka siinta iyo daawada.
- ✓ **Deeqda Alaabada Muhiimka ah ee Guriga –**  
si looga caawimo dadka goobaha dhibaatadu ku dhacday kuwaas oo aan caymis lahayn ama aan awoodin si ay helaan caymis si ay u bedelaan alaabta guriga taal.
- ✓ **Adeegyada Muhiimka u ah Amaanka iyo Deeqda Dib-u-xirida –**  
dadka jooga goobaha dhibaatadu ku dhacday si ay u caawimaan dib ugu xirida adeegyada muhiimka ah sida korontada, gaaska, biyaha, bulaacadaha ama baraha wasakh mareenka ah.
- ✓ **Adeegyada Muhiimka ah ee Caawimada Deeqda –**  
Kaalmooyinka dadka ay tooska u saamaysay masiibada si degdeg in wax looga qabto baahiyaha marka mid ama ka badan oo ah adeegyada muhiimka ah ay shaqayn waayaan shan berri ka badan.
- ✓ **Deeqda Caawimada dhismaha –**  
dadka jooga goobaha dhibtooda wax laga qabanayo si looga caawimo dayactirka guryahooda iyo ka dhigida amaan nabad qaba amaana loogu noolaan karo.

\*Heerka Xaq-u-yeelashada waxay khusaysaa

In la hello deeqdee ayaa laga heli karaa goobtaada hubina xaq u yeelashadaada, oo booqo [www.qld.gov.au/disasterhelp](http://www.qld.gov.au/disasterhelp)

## Macluumaad intaas ka badan

Xukuumada Queensland waxay bixisaa adeega tarjumaanka si ay u bixiso macluumaad ku saabsan masiibooyinka, deeqaha ama kaalmada ku qoran luqadaada.

Wac **1800 512 451** weydiina mutarjumka luqadaad door bidayso ama wac Khadka Ka-bogsiga Bulshada **1800 173 349**.

